Barnaamijka Kaalmada Tamarta ee Minnesota wuxuu fidiyaa bixinta faa'iidooyin dheeri ah, Xeerka iska ilaalinta Cimilada Qaboow wuxu bilaabmayaa goor hore

Si dhaqso ah loo Sii Deyn doono, Sibteembar, 27, 2021

Sannadkan, Reer Minesooto waxay heli karaan taageero maaliyadeed oo kuwii hore ka badan iyo ilaalin dhowaan la fidiyay si ay guryahooda ugu diirsadaan ilayskana ugu shitaan iyagoo isticmaalaya Barnaamijka Kaalmada Tamarta ee Xeerka cimilada Qaboow ee Minesoota.

CUSUB 2021:

Reer Minesootihii ugu badnaa ee abid ayaa u qalmay Barnaamijka Kaalmada Tamarta. Sannadka 2021, Waaxda Ganacsiga ee Minesoota, taas oo ka shaqeysa Barnaamijka Kaalmada Tamarta, waxay heshay in ka badan $130 malyuun oo deeq federaal ah, mid dheeraad ahna dayrtan baa la filaya, si loogu kaalmeeyo qoysaska Minisoota. Barnaamijka Kaalmada Tamarta wuxu qoysaska Minesota ka caawiya inay iska bixiyaan biilasha hadda iyo kuwii hore ee korontada, gaasta, shidaalka, shidaalka-noolaha, iyo borabaynta, shidaal keenista degdega ah, beddelaadda/dayactirka nidaamyada kulaylinta ee guryaha ka jaban, waxayna sidoo kale daboolaysaa biilasha biyaha iyo adeegyada bulaacadaha.

Ganacsigu wuxu kor ugu qaadey xadka celceliska ah ee dakhliga ee dadka u qalma ee Menisoota 60% ($67,765 sannadkiiba qoyskii afarta qof ah) wuxuna si wayn u soo kordhinaya lacagta kaalmada ah si loogu yareeyo culeysyada tamareed sida ugu badan, oo ay ku jiraan illaa $1,600 oo biilasha tamarta ah, illaa $1,200 oo biilashii tamarta ahaa ee la soo dhaafay ah.

Isbedeladaas dartood, **In ka badan 600,000 oo Reer Menesoota ah ayaa dakhli ahaan u qalma Kaalmada Tamarta,** taasoo si wayn u kordhisay cidda heli karta kaalmadan muhiimka ah. Sannadkii hore ee barnaamijka (Oktoobar 2020 - Sibteembar 2021), waxa soo codsaday illaa 116,000 qoys oo Reer Minesoota ah ayaa soo codsaday barnaamijka una qalmay Kaalmada Tamarta.

Xeerka Jawiga Qaboow waxa uu dhaqangelayaa horraanta (Oktoobar 1) wuxuna dhammaanayaa gadaasha (Abriil 30). Xeerka Cimilada Qaboow ee Minisoota (CWR), oo ay maamulaan Guddida Adeega Bulshada ee Minisoota, wuxu macaamiisha adeegyada tamarta iyo biyaha ee Minesoota ka ilaaliyaa in laga jaro korontada iyo gaasta intii u dhexaysay Oktoobar 1 iyo Abril 30. Muddada Xeerka Cimilada Qaboow shaqaynayo waxa Sharcidejinta Menistoota ku kordhisay 15 beri oo jiilaalka ah iyo 15 beri oo gugii ah. Ganacsigu wuxu u dooday fidinta ka dib markii ay wada tashi sannadle ah la sameeyeen dhowr Qaran Qabiileed kana maqleen walaacyo ku saabsan in isbedelka cimilada ee Minisoota keenayso qaboow biloowga hore ee dayrta iyo gadaasha guga ah.

Dadka guryaha leh iyo kiraystayaasha labadooduba way u qalmaan ilaalinta CWR - xisaabta adeegu waa inay magacaaga ku qornaato. Adiga iyo adeegbixiyahaagu waa inaa isku waafaqdaan qorshe lacag bixineed oo ku habboon qoyskaaga.

Wixii macluumaad dheeraada ama kaalmo ah, ka eeg PUC macluumaadka khadka ee "adeeg Jaris Ilaalinta ama wac Xafiiska Arrimaha Macaamiisha ee PUC: 651-296-0406.

Kaalmada kharashka biyuhu waxay la keenay dhowaan qoysaskuna waxay sidoo kale u qalmi karaan cimilayn. Marka aad hal codsi ka soo dhex gudbiso Barnaamijka Kaalmada Tamarta, qoysasku waxay u qalmi karaan lacag ay ku daboolaan biilasha biya iyo tamarta labadaba, taasoo ka dhigaysa qaar u qalma Barnaamijka Cimilaynta ee Minesoota, oo sidoo kale uu isna Ganacsigu ka shaqeeyo. Cimilayntu waxay qoysaska ku caawisaa hagaajin dhanka guryaha ah si loo marxiyo tamarta si joogta ahna hoos loogu dhigo kharashka ku baxa tamarta. Kaalmada biilka biyuhu way cusub tahay, waxana lagu sameeyay lacag halmar ah oo federaalku ku baxshay Xeerka Qorshaha Samatabixinta ee Maraykanka.

"Guddida Ganacsigu waxay ka shaqeynaysaa inay dadka Menosoota siiso ikhtiyaaro dheeraada si ay isaga bixin karaan adeegyada muhiimka ah - kulaylinta, biyaha, ilayska, korontada - ee ay u baahan yihiin si ay guryahooda si badbaado iyo raaxo leh ugu joogaan," ayuu yidhi Guddoomiyaha Guddida Ganacsiga Grace Arnold.

"Dadku waa inay wacaan adeeg bixiyayaashooda oo iska diiiwaangeliyaan qorshe lacagbixineed, ama ay soo wacaan xafiisyadayada si loo caawiyo. Waxaanu rabnaa in qof kastaa helo caawimada ay u baahan yihiin si ay u helaan koronto la isku halleyn karo jiilaalkan", ayay tidhi Katie Sieben, Gudoomisada Golaha Adeega Bulshada ee Menasoota.

BARNAAMIJKA KAALMADA TAMARTA

Sidee baad u codsanaysaa? Dalbo codsi ama kuwan soo socda midkood ka raadso adeeg bixiyahaaga maxalliga ah:

- Khadka ka raadi "Minnesota energy assistance"
- Khadka soo gal: mn.gov/EnergyAssistance
- Wac 800-657-3710 oo riix 1

Yaa xaq u ? Reer Minnesota ka badan kuwii hore aya u qalma.

- Dadka guryaha leh ***iyo kiroolayaashuba*** way u qalmaan kaalmada tamarta.
- Ganacsigu wuxuu kor u qaaday u -qalmitaanka dakhliga boqolkiiba 60% dakhliga celceliska ah ee qoyska.
- Codsigu wuxu tixgelinayaa dakhligii 3dii bilood ee u dambeeyay kuman jirto lacagta taageerada ah ee federaalku baxsho ama lacagta shaqo la'aanta.

Sidee buu barnaamijku u shaqeeyaa?

- Lacagta biilasha biyaha iyo tamarta waxa si toos ah loogu diri doonaa shirkadaha baxsha adeegyadaas.
- Qoysasku waxay sidoo kale helayaan waxbarasho khuseysa adeegsiga tamarta ee badbaadsan wax ku oolkana ah.

XEERKA CIMILADA QABOOW

Sidee baad isu qoreysaa?

La xiriir shirkadaada gaasta dabiiciga ah ama korontada oo ka codso qorshaha lacagbixinta ee Xeerka Cimilada Qaboow (CWR). Qorsheyaasha lacagbixinta waxa la dejin karaa waqti kasta oo xilliga CWR ah. Haddii aad awoodi waydaan inaad ku heshiisaan xaddiga lacagbixinta, waxaad xaq u leedahay inaad ambiil ka qaadato shirkadaaga gaasta dabiiciga ah ama korontada. Xafiiska Arrimaha Macaamiisha ee Guddida Adeegyada Bulshada ee Minisoota ayaa diyaar u ah inuu ku caawiyo.

Kulalyka gurigaaga miyaa lagaa damin karaa xilliga jiilaalka?

HAA. Waa inaad qorshe lacagbixineed CWR ah la sameysataa oo aad haysataa shirkadaaada gaasta dabiiciga ah ama tamarta si aad u hesho ilaalinta CWR ee inta u dhexaysa Oktoobar 1 illaa Abriil 30. Tani waxay khuseysaa dhammaan macaamiisha deegaanka ah, oo ay ku jiraan dadka waawayn iyo qoysaska caruurta yaryar haysta.

Qorsheyaasha lacagbixinta waxa la dejin karaa waqti kasta oo xilliga CWR ah. Haddii qorshaha lacagbixinta aad adigu jebiso, shirkadda gaasta dabiiciga ah ama korontada lagama rabo inay kuu soo bandhigto qorshe kale oo dheeraad ah. Haddii aad awoodi waydaan inaad ku heshiisaan xaddiga lacagbixinta, waxaad racfaan ka codsanaysaa shirkadaada gaasta dabiiciga ah ama korontada.

Waan Kula Jirnaa Maalin Kasta
Ujeedka Waaxda Ganacsiga ee Minasoota waa inay ilaaliyaan Reer Minisoota iyo falalkooda ganacsi ee maalinlaha iyagoo baaraya qiimeynayana adeegyadooda, una doodaya in adeegyadaas noqdaan kuwo caddaalad ah, la heli karo oo la bixin/goyn karo. Meel kasta oo aad Minisoota ka joogto, Waaxda Ganacsigu way kula jirtaa maalin kasta. Haddii aad gaasta soo dhaansanayso, guri iibsanayso, ka shaqeynayso sidaad u dhimi lahayd adeegsiga tamarta ama uga soo kaban lahayd masiibo kugu dhacday ka dib — waanu kula jirnaa, si kasta oo wax u jiraan. Waaxda Ganacsiga ee Minosoota waxay kormeertaa in ka badan 20 nooc-shirkadeed oo xakamaysan, si loo hubiyo in ganacsiyada Minisoota xooggan yihiin macaamiishooduna ilaashan tahay. Wax badan ka baro mn.gov/commerce.

Guddidda Adeega Bulshada ee Minisoota
Guddidda Adeega Bulshada ee Minisoota waxay koontaroolaan saddex shirkadoo oo adeegoodu dhaqaalaha Minisoota aasaas u yahay: Koronto, gaasta dabiiciga ah iyo taleefanka. Yoolka Gudidu waa inay abuuraan oo joogteeyaan deegaan koontarool kaas oo hubiya helitaanka adeegyo gaas, koronto iyo biyeed badqaba, ku filan dadka oo caddaalad ku dhisan

kuwaasoo la jaanqaadaya shuruucda isgaarsiinta iyo tamarta ee Gobolka. Waxay taas ku gaartaa inay kormeer iyo kaantarool madaxbanaan, joogto ah oo isku dhafan ku sameyso shirkadaha bixiyaha adeegyada tamarta ee bulshada. Wax badan ka baro mn.gov/puc

XIRIIRADA ISGAARSIINTA

Mo Schriner
Waaxda Ganacsiga ee Minisoota (Minnesota Department of Commerce)
651-363-1227 | mo.schriner@state.mn.us

Will Seuffert
Guddidda Adeega Bulshada ee Minisoota (Minnesota Public Utilities Commission)
651-201-2217 | will.seuffert@state.mn.us